DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA
الرسمية

RASMIGA
الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 15-aad. Garowe August 10, 2013** **Lam.8**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansixinta Xeerka Nootaayanimada**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 10. ee 10/08/2013, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Nootaayanimada***

2250 x
5
1125 0

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 10 ee August 10, 2013,** _kuna saabsan Ansixinta Xeerka Nootaayanimada.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad; |
| Markuu arkay: | Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/63/2013 ee 05/08/2013; |
| Markuu tixgeliyey: | Muhiimadda Ansixinta Xeerka Nootaayanimadu u leeyahay Dowladda Puntlanda. |

## <u>Wuxuu soo saaray</u>

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Nootaayanimada

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Ansixinta Xeerkan Nootaayanimada wuxuu noqonayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda. Lagana baahiyo Idaacadaha iyo Jaraa'idka Markaa ka dib ayaa Xeerkani dhaqangelayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto kuna dhaqanto.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بنت لاند الصومال

**GOLAHA WAKIILADA**

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Ref:-* <u>XGGW/DPL/ 63 /2013</u>** **Garoowe, Isniin** Date:-**<u>05/08/2013</u>**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **<u>Ansixin Xeerka Nootaayanimada</u>**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref **MW/DPS/186/2013** ee July 28,**2013** kuna saabsan Xeerka Nootaayanimada Puntland . |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan. |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Nootaayanimada ee Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOOMAALIYA**

ولاية بنت لاند الصومال

**GOLAHA WAKIILADA**

مجلس النواب

# XEERKA

# NOOTAAYADA PUNTLAND

**Garoowe, August 5- 2013**

# Xeerka Nootaayada

## QODOBKA 1--AAD

## Macnayn Nootaale

1. Nootaaluhu waa hawlwadeen rasmi ahaan u xilsaaran qorista dokumentiga khuseeya ama dhexmara dadka iyo qorista iyo sugidda dardaaranka.
2. Nootaayuhu wuxuu siinayaa dokumentiga kalsooni, kaydinta dokumentiga, bixinta nuqullo iyo caddeymo.

## QODOBKA 2-AAD

## Xilka Nootaalaha

Shaqada nootaaluhu waxaa ka mid ah xilalka hoos ku qoran:-

1. Kala wareejinta hantida sharciyeysan ee guurtada iyo ma-guurtada.
2. Qorista mucaamalaadka
3. Sharciyeynta wakaaladaha
4. Diyaarinta iyo sugidda caddaymaha sharciga ah
5. Diyaarinta iyo sugidda heshiisyada sharciga waafaqsan
6. Diyaarinta iyo sugidda qoraallada dardaaranka
7. Diyaarinta iyo sugidda lahaanshaha iyo isla lahaanshaha iyo
8. Wax kasta oo xeerku u banneeyo.
9. Inuu saxiixo, qoro dacwooyin aan doodi ka taagneyn oo ay ku aamineen dhinacyadu.
10. Inuu qoro dokumentiga rasmiga ah ee ku saabsan arrimaha madaniga iyo kuwa ganacsiga.
11. Inuu kaydiyo asalka iyo nuqulka qoraallada rasmiga ah iyo inuu kaydiyo qoraallada dhinacyadu saxiixeen, warqadaha iyo dokumentiga, xataa haddii lagu soo sameeyey dalal shisheeye.
12. Inuu saxiixo xaqiijiyana buugaagta ganacsiga sida uu qabo qaanuunka madaniga ama kan ganacsiga.
13. Inuu nuqullo ka bixiyo dokumentiga loo keensado, diiwaanka iyo buugagta ganacsiga.
14. Inuu caddeyn ka bixiyo nolosha qof la soo weydiistey inuu noolyahay.
15. Sugidda qoraallada mucaamilaadka oo ay dhinacyadu u kala qorteen si madaxbannaan iyo xafidaa nuqullada qoraalladooda.
16. Inuu sugo ama diiwaangeliyo dokumentiga leh awood sharci oo si ikhtiyaari ah dhinacyadu u kala qorteen.

17. Sugidda kala wareejinta lahaanshaha hantida ma-guurtada iyo guurtada ah iyadoo sida loola kala wareegayo iyo shayga lala kala wareegayo ay waafaqsan yihiin sida ay qabaan xeerarka Dawladda Puntland.
18. Inuu sameeyo caddeynta qoraalka maragga maqan.
19. Inuu sameeyo ama sugo qoraallada dardaaranka iyagoo lagu caddeynayo qoraalka taariikhda, saacadda iyo magaca markhaatiyaasha goobjoogga ah iyo kuwa loo dardaarmay haddii ay joogaan.

## QODOBKA 3-AAD

## WAKIILASHO GARSOOR

Nootaaluhu isagoo wakaalad ka haysta garsoorka wuxuu sameyn karaa:

1. Inuu xiro ama furo isaga oo ka qaadaya sajilaadda shaabadda ama saaraya meelaha amarka lagu bixiyey iyada oo la raacayo sharciga madaniga ama ganacsiga.
2. Inuu caddeeyo liiska tiro-koobaya hantida, iyadoo la raacayo sida uu qabo sharciga madaniga iyo kan ganacsiga iyo dhamman wixii ku saabsan xaraashka, naadada iyo wixii kale oo looga baahdo isla goobta laga hawlgelayo ama naadada lagu qabanayo.

## QODOBKA 4-AAD

## SHURUUDAHA NOOTAALAHA

Waxaa noqon kara nootaale

1. Qof haysta shahaado sharci ee jaamacadeed leh Khibarad ugu yaraan hal sano ah kana soo shaqeeyey hay-adaha sharciyada sida xafiiska garyaqaanka guud, qareennada, garsoorka iwm:
2. Inuu yahay muwaadin puntlander Soomaali ah,
3. Waa in aysan da`diisu ka yareyn 23 (saddex iyo labaatan sano),
4. Waa inuu ku sugan yahay xaalad caafimaad oo u saamaxaysa gudashada xilkiisa,gaar ahaan xagga maskaxda, indhaha iyo dhegaha,
5. Waa inaan maxkamadi ku ridin xukun dembi culus oo kama dambeys ah 3-dii (saddexdii) sano ee u dambeysey,
6. Waa inuu yahay qof ku sifoobey hufnaan, daacadnimo, aqoon iyo kartina u leh nootaalenimada.

## QODOBKA 5-AAD
## NOOTAALE QALAAD

Nootaale ajnebi ah waa ka shaqayn karaa waana ka furan karaa xafiis nootaayanimo Puntland, haddii uu buuxiyo shuruudaha ku xusan qodobka 4-aad qaybihiisa 2-aad ilaa

5-aad iyo qodobka 6-aad ee isla xeerkan isla markaasna qawaaniinta dawladda uu ka tirsan yahay oggoshahay in muwaadinka puntlanderka ah uu xafiis nootaalenimo ka furan karo dalkiisa.

## QODOBKA 6-AAD

## RUQSADDA NOOTAALENIMADA

1. Nootaaluhu si uu u socodsiiyo hawlihiisa nootaalenimo waa inuu ruqsad qoraal ah ka haystaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arimaha Diinta ee Dawladda Puntland.
2. Ruqsadda nootaalenimada lama siin karo shaqaalaha dawladda u shaqeeya rayid iyo ciidan toona iyo kuwa u shaqeeya hay-adaha caalamiga ah, inta ay hayaan shaqadooda.

## QODOBKA 7-AAD

## XAFIISKA NOOTAALAHA

1. Nootaaluhu wuxuu xafiis ka furan karaa magaalada ruqsadda loo siiyey oo keliya.
2. Nootaaluhu kuma furan karo labo xafiis ruqsadda nootaalenimada umana bannaana inuu xafiiska la wadaajiyo mehered kale sida meherad ganacsi, qareennimo, NGO, iwm.
3. Haddii uu ka guuro xafiiskii lagu yiqiin waa inuu baahiyaa goobta cusub oo uu u guuray si maamulka dawladda iyo dadweynuhuba ula socdaan.
4. Haddii nootaaluhu geeriyoodo ama ruqsadda lagala noqdo, dokumentiga xafiiska ku kaydsan waxaa lagu wareejinayaa Wasaaradda Caddaaladda iyo Arimaha Diinta ee Dawladda Puntland.

## QODOBKA 8-AAD

## QAABKA QORAALKA NOOTAALAHA

Qoraalka nootaaluhu waa in uu u habeysan yahay una qoran yahay qaabkan hoos ku sheegan waana in lagu qoro:

1. Magaca DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA bogga koowaad qaybta sare ee qoraaalka.
2. Waa in lagu muujiyo dhammaan tilmaamaha hoos ku taxan:
    - Sanadka, bisha iyo maalinta oo ku qoran far xuruuf ah iyo xisaab iyo goobta lagu qabanayo shaqada iyo taxaxa diiwaanka.
    - Magaca oo saddexan iyo rugta nootaalaha.
    - Magaca oo saddexan, goobta iyo taariikhda dhalashada, degaanka iyo xaaladda dhinacyada, markhaatiyada, damiintayaasha, wakiillada iyo turjumaanada haddii ay jiraan.

3. Caddeynta xaqiiqda ah iyo sugnaanta dhinacyada iyadoo loo marayo kuwa ugu dhow ama haysta kalsoonida nootaalaha.
4. Sheywalba iyadoo si dhab ah loo cayimayo si aan la iskugu beddelin ama si isweydaar ah la isku dhaafin. Marka qoraalku ku saabsan yahay:-
   - Hanti ma-guurto ah waxaa la sheegayaa baaxaddeeda, nooceeda,meesha ay ku taal, iyo soohdimeheeeda, si loo hubiyo loona sugo jiritaanka runta ah ee isla hantidaas.
   - Hanti guurto ah waxaa la sheegayaa dhammaan tilmaamaha lagu sugi karo, tusaale ahaan baabuur iyo wixii la mid ah waxaa lagu caddeynayaa lambarka (taargada), lambarka injiinka (Engine No.), lambarka caqaayada (chassis No.)
5. Dokumentiga ganacsiga iyo qoraallada la soo dhexgeliyo ama la socda waraaqaha.

## QODOBKA 9-AAD

## MEELMARIN

Hawlaha nootaalaha ee ku cad xeerkan waxay meelmar noqonayaan haddii uu saxiixo nootaalaha magaciisu ku qoran yahay ruqsadda ay bixisay Wasaaradda Caddaaladda oo keliya. Haddii qoraallada khuseeya nootaalaha ay saxiixdo cid kale waxay noqonayaan wax kama jiraan aan sharci ahaan lana isticmaali karin.

## QODOBKA 10-AAD

## WARGELIN GEERI

1. Haddii ay geeri ku timaado nootaalaha waa in ay ehelediisu ku soo wargeliyaan Wasaaradda Caddaaladda iyo Arimaha Diinta ee Dawladda Puntland muddo aan ka badneyn 48 (afartan iyo siddeed) saacadood waqtiga ay ka warheleen dhimashadiisa si loo xafido dokumentiga xafiiska ku kaydsan.
2. Haddii aan ehelada nootaaluhu ka warhayn geeridiisa waxaa wargelinta u xilsaaran hay'adaha nabadgelyada iyo dawladda hoose ee degmada uu ku geeriyoodey.

## QODOBKA 11-AAD
## AFKA WAX LAGU QORAYO

1. Qoraalka nootaalaha waa in lagu qoro af-soomaali, haddi lagu qoro luuqad kale waa in loo turjumo dhinacyada aan fahmi karin.
2. Dhegoolaha, Indhoolaha iyo aflaawaha aan waxba akhriyi karin waxaa hawsha u fulinaya wakiil uu ku kalsoon yihiin.

## QODOBKA 12-AAD
## QORAALLADA KA REEBAN NOOTAALAHA

Nootaaluhu ma qaban karo qoraallada soo socda:

1. Qoraallada xeerarku aysan u oggolayn.
2. Haddii ay dhinac ka tahay xaaskiisa ama qaraabo dhow oo isaga la xiriirta sida xidiidkiisa oo kale ama qaraabadiisa ilaa darajada 4-aad, sidoo kale haddii dadkaasi ku soo dhexgalaan hab wakaaladeed ama hab maamul shirkadeed.
3. Haddii qoraalka ay ku qoran yihiin awaamir isla nootaalaha khuseeya ama xaaskiisa iyo qaraabadiisa tooska ah ama cid uu wakiil ka yahay oo isla heshiiskaas ku lug leh.
4. Reebannaanta ku xusan ee isla qodobkan, waxaa loo ictibaarayaa xaaska la furey iyo qaraabada xaaska geeriyootey. Laakiin laguma dabiqi karo xaaladaas dadka ku sheegan faqrada 1–aad iyo 2-aad ee isla qodobkan, haddii la joogo goobta xaraashka ama naadada lagu qabanayo.

## QODOBKA 13-AAD
## SUGITAAN

1. Nootaaluhu waa inuu indhiisa ku arkaa sheyga qoraalku ka hadlayo ama lala kala wareegayo.
2. Nootaaluhu markuu dhammeeyo qoraalka waa in uu u akhriyo dhinacyada uu khuseyso iyagoo goobjoog ah.
3. Qoraalka ka kooban bogag badan waa in ay bog kasta hoosta ka saxiixaan dhinacyadu, turjubaanadu, markhaatiyadu, damiintayaashu, wakiiladu iyo nootaaluhu.

## QODOBKA 14-AAD

## QORAALKA ASALKA AH

1. Qoraalka asalka ah ee nootaaluhu waa inuu ku qoran yahay khad aan la tirtiri karin, waana in loo qoro hab sahlaya in la akhyiri karo lana fahmi karo, aan cillad lahayn ama sadarrada dhexdooda aan wax lagu dari karin, la soo gaabin karin, la sixi karin, la beddeli karin ama aan wax lagu kordhin karin jiritaanka qoraalka, sidoo kale aan tirtirid lahayn.

2. Qoraalka asalka waa in ay suulka bidix iyo qalinba ku saxiixaan dhinacyadu, markhaatiyaashu, wakiilladu, damiintayaashu iyo turjumaanadu iyadoo nootaaluhu qalin ku saxiixayo.

## QODOBKA 15-AAD
## AKHRIN IYO GUDBIN QORAAL

1. Haddii dhinacyada, wakiillada ama damiintayaasha qaarkood aysan waxba akhriyin, waa in nootaaluhu xaaladdan ku caddeeyaa qoraalka loona akhiriyaa hadalkooda la qorey.
2. Qoraalka nootaalaha waa la iskugu gudbin karaa qalabka isgaarsiinta ee muujinaya muuqaalkiisa dhabta ah iyo kaamilnimadiisa.

## QODOBKA 16-AAD

## WAX-KA-BEDDELKA QORAALKA

1. Marka loo baahdo in qoraalka wax laga saaro, wax laga beddelo ama erey uun lagu daro, inta aysan hoos ka saxixin dhinacyadu,markhaatiyadu iyo turjubaanku, waa in loo isticmaalo habka wax tirtiridda si mar kasta loo akhrin karo.

2. Wax ku daridda iyo isku beddelka ay dhinacyadu u baahdaan inay sameeyaan, ka dib marka iyaga iyo markhaatiyadu hoos ka saxiixeen, laakiin ka hor intaan nootaaluhu hoos ka saxiixin waa in lagu fuliyaa caddeyn si gaar ah loo habeeyey; waana in la isu akhriyo waxyaabaha lagu daray ama la isku beddeley lana saxiixaa.

## QODOBKA 17-AAD
## HIRGELNTA QORAALKA NOOTAALAHA

Qoraalka nootaaluhu wuxuu sharciyan ku hirgelaa kolka ay joogaan dhinacyada qoraalku khuseeyo iyo labo markhaati, haddii xeerku uusan si kale u xadidayn.In ay joogaan labo markhaanti shardi uma aha dhammaan qoraallada nootaalaha ee macluumaadka caamka ah, sida dokumentiga la tasdiiqiyo ama kuwa la isku wareejiyo sida jeegagga oo kale iyo wixii la mid ah.

## QODOBKA 18-AAD

## IS-AFGARAD

Dhinacyada wax qori kara, akhriyi karana waxay awood u leeyihiin in ay si wadajir ah isku af-gartaan inay ka maarmaan labada markhaati ee looga baahan yahay qoraalka nootaalaha, marka laga reebo arrimaha ku saabsan wax u hibeynta iyo heshiiska nikaaxa. Nootaaluhu waa inuu bilowga qoraalka si cad ugu xusaa is-afgaradka dhinacyada.

## QODOBKA 19-AAD

## HUBINTA DHINACYADA

Nootaaluhu waa inuu shakhsiyan hubiyaa jiritaanka qof ahaaneed ee dhinacyada. Haddii taas la waayo waxaa u bannaan nootaalaha inuu hawsha ku fuliyo labo qof oo uu ku kalsoon yahay inay hubiyaan, kuwaas oo noqon kara markhaatiyaal.

## QODOBKA 20-AAD

## MARKHAATIYAAL

Markhaatiga qoraalka nootaalaha waa inuu qaangaar yahay, ha ahaado muwaadin ama ajnabi deggan Puntland, waana in ay u dhan yihiin dhammaan xuquuqda qawaaniintu siineyso qofka muwaadinka ah iyo kan ajnabiga ah. Markhaatigu waa in uusan wax masaaliix ama dan gaar ah ka lahayn qoraalka nootaalaha. Markhaati ma noqon karo indhoole, dhegoole iyo aamusane aan hadli karin iyo dadka ku xusan qodobka 12-aad faqrdaha 2-aad iyo 3-aad ee isla xeerkan ee xiriirka qaraabonimada la leh nootaalaha iyo kuwa aan aqoonta u lahayn waxa ay hoos ka saxiixayaan.

## QODOBKA 21-AAD

## SAXIIXA NOOTAALAHA

Saxiixa nootaaluhu saaro qoraalka dhammaadkiisa waa inay weheliso shaabadda xafiiska ee isla nootaalaha.

## QODOBKA 22-AAD

## WAREEJINTA QORAALKA NOOTAALAHA

Nootaaluhu wuxuu ku wareejin karaa qoraalka oo dhammeystiran dhinaca uu khuseeyo, ka dib marka uu hubiyo in la bixiyey dhammaan canshuurtii dawladda ee ku waajibtay isla qoraalka laga hadlayo.

## QODOBKA 23-AAD

## KORMEER IYO BAARIS

1. Wasaaradda Caddaaladda iyo Arimaha Diinta iyo Wasaaradda Maaliyadda waxaa midkasta, gooni ahaanteeda, awood u leedahay inay kormeer ku sameyso xafiiska nootaale kasta si loo hubiyo habsami-u-socodsiinta adeegga dadweynaha, dhammeystirnaanta qoraallada iyo diiwaannada xafiiska nootaalaha.
2. Baarista hantida dawladda ee ka soo xeroota xafiiska nootaalaha waxaa u xilsaaran hantidhowrka guud ee Dawladda Puntland.

## QODOBKA 24-AAD

## ANSHAX-MARIN

1. Haddii nootaaluhu galo gef la xiriira habsami-u-socodsiinta meheradda nootaayanimada, waxaa Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arimaha Diinta ku anshax-marin karaa:
    b) In digniin qoraal ah la siiyo nootaalaha;
    t) In la ganaaxo, iyadoo lagu saleynayo ganaaxa hadba culeyska uu leeyahay gefka uu galay;
    j) In shaqada laga joojiyo nootaalaha muddo aan ka badneyn lix bilood;
    x) In ruqsadda nootaalenimada lagala noqdo.
2. Go`aanka kala noqoshada ruqsadda nootaaleanimada ee ku xusan faqradda koowaad xarafka (x) ee isla qodobkan waxaa soo saari kara Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda.

## QODOBKA 25-AAD

## FALDEMBIYEED

1. Haddii nootaaluhu yareeyo qiimaha hantida lagula kala wareegayo ujeedaduna tahay in canshuurta dawladdu yaraato, wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ciqaab u dhiganta faldembiyeedka uu sameeyo iyadoo loo cuskanayo hadba xeerka uu ku xadgudbo.
2. Nootaalaha lagu rido xukun kama dambeys ah oo la xiriira shaqadiisa wuxuu luminayaa xaqa lahaanshaha ruqsadda nootaalenimada.
3. Qofkii ay ku caddaato inuu bixiyey in ka yar canshuurtii ku waajibtey oo la xiriirtey kala wareejinta hantida, wuxuu bixinayaa canshuurtii dawladda oo uu qariyey iyo ganaax dhan 5% canshuurta ku baaqatay.

## QODOBKA 26-AAD

## KHIDMADDA ADEEGGA IYO CANSHUURTA

1. Nootaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo khidmo adeeg oo u dhiganta hawsha nootaalenimo ee uu qabtay.
2. Qoraalka kasta oo sharciyeed oo uu sameynayo nootaaluhu waxaa ku waajibaya canshuur dawladeed.
3. Qiimaha khidmadda adeegga nootaalaha iyo canshuurta dawladda ee ku waajibtay qoraalka kasta oo uu sameeyo nootaaluhu waxaa lagu soo saarayaa xeer-hoosaad.
4. Waxaa lagu sii dhaqmayaa xeerarka hadda jira tan iyo inta laga soo saarayo xeer-hoosaadka ku xusan faqradda (3) ee isla qodobkan.

## QODOBKA 27-AAD

## CANSHUURTA DAWLADDA

Dhammaan lacagta canshuurta waxaa lugu shubayaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dawladda Puntland iyadoo caddeyn la siinayo canshuurbixiyaha.

## QODOBKA 28-AAD

## BURIN

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imanaya ama aan la socon Karin xeerkan.

## QODOBKA 29-AAD

## DHAQANGAL

Xeerkani wuxuu dhaqangal noqonayaa, marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**